



Hagaha...baaridda abtirsiinyadaada

Dadka waxay jecel yihiin inay wax ka ogaadaan awooweyaasha ay ku abtirsadaan. Wuxuu ina tusinaayaa nolol horey iyo meelo horey. Waxaa fiican in la ogaado waxa aan dhaxalnay – haddii ay tahay hanti qoys ama gadh qoys.

BILOW BAARISTA

Meesha ugu fiican ee aad ka bilaabi karto waa – laftigaaga! Qor wax walba ee aad ka taqaanid adiga iyo qoyskaaga, adigoo diiradda saaraaya:

- Magaca buuxa
- Taariikhda dhalashada, ninkaaxa iyo dhimashada
- Meelaha ay ku noolaayeen.

Qaraabadaada weydii macluumaadkaan, iyo eeg ilaa taariikhdee ay xasuusan karaan. Laakin xasuuso inaad aahaato qof taxadar leh. War taariikh ee adiga xiiseynayso wuxuu ayaga u ahaan karaa xasuus xannuun leh.

RAADINTA CADDEYMO

Markii aad la hadasho xubinada qoyska, weydii haddii aad eegi kartid dokumentiyadooda rasmiga ah – ee badanaa ku jiro sanduuqyo, boorsooyin ama armaajooyin!

Waxaa gaar ahaan waxtar kuu ah:

- Shahaadoyinka dhalashada, ninkaaxa iyo dhimashada
- Dar-daaranka
- Diiwaanka shaqada
- Lacag-bixinta hawlgabka
- Shahaadoyinka waxbarashada iyo xirfadda
- Warqadaha adeegga militariga.

Waxaad xittaa eegtaa bogga koowaad ee kutaabka Masiixiga sababtoo ah dadku mar mar halkaas ayeey ku qoran faraca qoyska.

Buugga masawirada waa meel kale ee aad macluumaad badan ka heli karto. Haddii uu suurtoagal yahay, sawirka dhabarkiisa magaca dadka ku qor laabis. Haddii aad sawirka soo amaahan karto, waxaad nuqulkiisa gelin kartaa kombyuutarkaaga, ama qof ayaad ka codsan kartaa inuu sidaa kuu sameeyo. Sawirka wuxuu si dhab ah dib u keenayaa faraca qoyskaaga.

SAWIR FARACA QOYSKAAGA

Markii aad macluumaadkaan hesho, waxaad bilaabi kartaa inaad sawirto faraca qoyskaaga. Soo qaado warqad bannaan:

- Magacaada iyo taariikhda dhalashada ku qor qaybta hoose.
- Qaybtaas korkeeda, ku qor magaca hooyadaada iyo aabahaada, magacyadaas korkoodana ku qor magaca awoowahaada, sidaasna ku wad.
- Waxaad xittaa ku qortaa taariikhda dhalashada dadka iyo waqtiga ay dhinteen.

HELIDDA CAAWINAAD

Waxaad u baahan doontaa inaad meel kale ka raadiso macluumaadka kaa maqan. Waxaa jiro iloyiin badan ee aad wararkaas ka heli karto – iyo dad diyaar u ah inay kugu caawiyaan helitaankiisa.

MAKTABADDAADA DEEGAANKA

Waa meel qiimo badan ee aad ka heli karto wararka qoyska ama taariikhda deegaanka. Weydii qofka joogaa maktabadda inay ku tusiyaan sidii loo isticmaalo daliil-haayaha.

Waxay xittaa kuu sheegi karaan wax ku saabsan ururyada deegaanka iyo macluumaad kale ee waxtar leh. Xarumaha internetka ee dalka Ingiriiska, qaar waxay ku yaalaan maktabadaha deegaanka, waxay kugu caawinaayaan raadinta adigoo isticmaalaayo bogag internet ee kala duwan.

Si bilaash ah ka wac 0800 77 1234 si aad u ogaato xarunta ku dhow.

BUUGAAGTA IYO MAJALLADAHA

Waxaan qaybtaan ku qornay liis yar. Miyaad eegtid haddii aad buugaagtaan maktabaddaada ka heli karto, ama kuu dalban karo?

Writing up Your Family History: A do-it-yourself guide soo saarey John Titford

Track Down Your Ancestors: How to Research Your Family History Using Archives & The Internet soo saarey Estelle Catlett

Who Do You Think You are?, laga soo saarey barnaamajka BBC ee dadka caanka ah ku raadinaayaan faraca qoyskooda.

Ancestors Magazine, laga soo saarey Xasuu-dhowrka Qaranka, waxaa ku jiro warar iyo iloyin internet, qoraallo iyo taloyin khibradeysan ee ku saabsan sida loo raadiyo abtirsinyadaada.

BOGAGGA INTERNETKA EE TAARIKHDA QOYSKA.

Macluumaad badan ee aad u bahan tahay waxaad ka heli kartaa bogga internetka. Qaar waa bilaash, war kalena waa inaad lacag ka bixisaa.

www.bbc.co.uk/history/familyhistory (bilaash). Bogga internetka ee BBC'da waa meel fiican ee aad ka bilowdo inaad ka baarto taariikhda qoyskaaga. Waxaad xittaa

codsan kartaa inay kuu soo diraan warside bilaash ah.

www.ancestry.co.uk (waa lacag). Diiwaanka qoyska ugu weyn ee dalka Ingiriiska, oo leh diiwaan gaaraayo sanadka 1300. Waxaa xittaa si bilaash laga heli karaa maktabadaha deegaanka.

www.genesreunited.co.uk (qaar bilaash ah). Macluumaad waxtar leh iyo iloyin.

www.genuki.org.uk (bilaash). Meel tusaaleyn, talo iyo macluumaad badan lagu haayo.

BOGAGGA INTERNETKA TAARIIKH DHAQAMEEDKA

www.besthistorysites.net

www.movinghere.org.uk

URURYADA WAXTARKA LEH

The National Archives – Xasuu-dhowrka rasmiga ah ee dawladaha Ingiriiska, waxaa ku jiro ka badan 1000 sano ee taariikh. Kew, Richmond, Surrey TW9 4DU. Tel: 020 8876 3444

www.nationalarchives.gov.uk

Society of Genealogists – maktabadda qaranka iyo xarunta waxbarashada taariikhda qoyska.

14 Charterhouse Buildings, Goswell Road, London EC1M 7BA. Tel: 020 7251 8799

www.sog.org.uk

People's Network – wuxuu dadka siiyaa meel ay internetka uga galaan si ay u helaan adeegyo matkabadeed baaxad leh, ay ku jiraan weydiimo shakhsiyadeed.

www.peoplesnetwork.gov.uk